



UJEEDO: WAKAALAD GUUD "PROCURO DE GENERALE"

Maanta oo ay taariikhdu tahay **25/08/2025**, Anigoo ah **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Lehna Nootaayaha Tayo, Xafiisna ku leh Wadada Koowaad ee Suuqa Bakaaraha Dhinaca Galbeed ee Daarta Maalin Tajir ee Magaalada Muqdisho, Waxaa iiyimid ayagoo heshiis ah, Mudanyaasha hoos ku Xusan:-

WAKAALAD BIXIYE:- CALI XASAN SIYAAD, Ina: Muslimo Axmed Geedi, Somali ah, Ku Dhashay: Galkacyo, Sanadkii: 01/01/1975, Sita: Warqad Sugnaan, Lr. 885138, kana soo baxday Dowladda Hoose ee Muqdisho (Ahna shaqsi xafiiska laga yaqaano).

LA WAKIISHE:- ABDIRISAK HASSAN SIYAD, Ina: Faadumo Isxaaq Xuseen, Somali ah, Ku Dhashay: Muqdisho, Sanadkii: 04/02/1960, Degan Garasbaalley, Sita: Somali Passport, Lr. P01381839, kana soo baxay waaxda Socdaalka iyo Jinsiyadaha Soomaliya

B- Aniga oo ah **CALI XASAN SIYAAD**, Waxaan qoraalkaan ku Cadaynayaa Aniga oo Maskaxda iyo Caqligaba ka fiyow Cid I qasabtayna aysan Jirin in aan Wakiishay Walaalkey **ABDIRISAK HASSAN SIYAD** una wakiishay Wax Alaale Waxii Hanti ah ee aan sida tooska ah milkiyadeeda u leeyahay guurto iyo maguurta ah, kuna taala Gobolka Banaadir & Gobolada kale ee dalka sida guryo, dhulal banaan, goof, beer, gaadiid, sheer shirkadeed, I.W.M. Waxaana si buuxda ugu wakiishay in uu ii gadi karo, Xafidi karo, dhisi karo, kireyn karo, Wareejin karo, Hibeyn karo, Rahan galin karo kana saari karo rahanta, dayactiri karo, ilaalin karo, isla markaasna bixin karo wixii canshuuraad ah ee igu soo waajibo, iina raadin karo wax alaale wixii Dukuminti Milkiyadeed ee Iga maqan, iina dalbi karo duplicate, u dacwoon karo, Qareen ii Qaban karo hadii loo baahdo, Xanaaneyn karo, igu matali karo magaceyga dhan kasta la iiga baahdo, una idman yahay in uu si buuxda Maxkamaddaha hortooda iiga Doodi karo, insha'allaahu.

Waxaan mar kale sii caddeynayaa in **ABDIRISAK HASSAN SIYAD** awoodaas aan siiyay uu u madax banaan yahay oo aniga Hantidaas aan soo sheegay ka macaamilideeda wax la iiga baahan karo aysan jiri doonin.

T- Aniga oo ah **ABDIRISAK HASSAN SIYAD**, Waxaan Nootaayada Horteeda Ka Caddaynayaa in aan aqbalay Wakaalada uu isiiyey Walaalkey **CALI XASAN SIYAAD**, islamarkaana aan Xilkaas aan ugu Soo Bixi doono Si Hufan oo Shareecada Islaamka Waafaqsan Insha Allah.

SAXIIXA WAKAALAD BIXIYAHA

CALI XASAN SIYAAD



1- AHMED BASHIR ALI



SAXIIXA MARKHAATIYAASHA

(XAFIISKA NOOTAAYAHA)

SAXIIXA LA WAKIISHAHA

ABDIRISAK HASSAN SIYAD



2- SADAQ ELMI HASSAN



REP. 1770/T.P.N/25, Tr. 25/08/2025, Muqdisho, Anigoo ah Nootaayaha Tayo:- **Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"**, Waxaan Sugayaa in Saxiixyada Kor Ku Xusan ay yihiin Saxiixyadii Runta ahaa ee 1- **CALI XASAN SIYAAD** Ahna (Wakaalad Bixiye), 2- **ABDIRISAK HASSAN SIYAD** Ahna (La Wakiishe) iyo Markhaatiyaasha, Waxaana Laga Wada Saxiixay ayagoo Raali ah, Caafimaad Qaba, Maskaxdoodu Taam tahay, Cid Khasabtayna aysan jirin Ka dib Markii Loo Aqriyey Wakaaladaan, Waxaa Lagu Qoray Diiwaanka Guud ee Nootaayada Waxaana Loo Keydiyey Nuqul.

NOOTAAYAHA
Dr. Maxamed C/laahi Maxamed "Max'ed Nootayo"






FOOMKA BIXINTA DUKUMINTIGA

Tr. 28/09/2025

Aniga oo ah **Maxamed Cabdi Cali** waxaan halkaan ka cadeynayaa in aan ku wareejiyay **C/risaaq Xasan Siyaad** Dukumiintiga **Original** Wakaalada Guud ee **Rep No. 1770/T.P.N/25, Tr. 25/08/2025**, faah faahintiisuna tahay sidan soo socota:

Magaca La Wakiishaha	C/risaaq Xasan Siyaad
Nooca	Wakaalad Guud
Loo Wakiishay	Dhamaan Hantida Wakaalad Bixiyaha Cali Xasan Siyaad
Taariikhda Wakaalada	25/08/2025

La Wakiishe: Aniga oo ah **C/risaaq Xasan Siyaad**, Leh Tel No. **0615920942**, Degan **Garasbaaley** Waxaan Halkaan ka Cadeynayaa in aan ka Qaatay Xafiiska **Nootaayaha Tayo** Dukumiintiga Wakaalada faah faahinteedu Sare ku cadahay.



Sawir

SAXIIXA DUKUMINTI BIXIYAHA

Maxamed Cabdi Cali

SAXIIXA DUKUMINTI QAADAHA

C/risaaq Xasan Siyaad
